UNIT 4: THE WORLD OF COLOR / WEEK 1

# Home Link - Somali







**Home Links Xirriirinta Guriga Cutubka 4: Dunida Midabka: Toddobaadka 1**
Qoysaska Qaaliga ah: Cutubkan wuxuu ilmahaagu baran doonaa midabada. Isku day ugu yaraan saddex kamid ah hawlahan waxbarasho ee xiisaha leh, ama dhamaantood samee! Waxa ugu muhiimsan waa inaad ku raaxaysato wakhtiga yar ee uu cunugaagu wax ku baranayo waxa ka dhacaya fasalka. Fadlan midabee sanduuqyada hawlaha aad doorato, kuna soo celi foomkan dugsiga Isniinta soo socota.
**XARAABEYSO!**

Magaca Ilmaha: ________________________________

## Luqadda

(La xiriira *Max's Dragon Shirt* ee ay qortay Rosemary Wells)

**Dhaqista dharka:**
Ku casuum ilmahaaga inuu kaa caawiyo inaad kala soocdo, dhaqdo, qallajiso oo aad laalaabto dharka.

**Bilaabayaasha Wadahadalka:**
- Sideen ayaan u kala soocnaa dharka?
- Sidee ayay dharkaagu u wasakhoobeen?
- Sidee ayaad u laablaabtaa shaadhkaaga?

**Ereyada aad isticmaali karto:**
- kala-sooc, cadaan, madow, saabuun dareere ah, heerheer?

## Sheeko-sheegid

(La xiriira *Max's Dragon* Shirt ee ay qortay Rosemary *Wells* iyo *Nana in the City* ee ay qortay Lauren Castillo)

**Dareemaya Xoog:**
U sheeg ilmahaaga sheeko ku saabsan waqti aad dareentay qof awood badan oo wada matala.

**Bilaawayaasha Wadahadalka:**
- Maxaa ka dhigay inaad xoog badan tahay oo aad awood leedahay?

## Hadal iyo Akhris Wadajir Ah
**(20 daqiiqadood)**

**Lagu bilaawayaasha Wadahadalka:**
- Waa maxay qeybta sheekada ka mid ah oo aad ugu jeceshahay?
- Waa maxay waxa ugu horreeya ee ka dhaca sheekada?
- Maxaad u maleyneysaa in uu yahay waxa soo xiga oo dhici doona?

## Xisaabta

**Qaabka Tiri oo Dhaqaaq:**
(Waa qaab isku xiga oo lagu celiyo unugyada: AB, AB, AB, ….)

Si kore ula tiri ilmahaaga ilaa iyo 20 ama inka badan adigoo sameynaya qaab dhaqdhaqaaq leh: 1 (sacabka tun), 2 (bood), 3 (sacabka tun), 4 (bood), 5 (sacabka tun), 6 (bood), 7 (sacabka tun), 8 (bood) iwm. ama 1 (is-wareeji), 2 (is-wareeji), 3 (is-rux), 4 (is-wareeji), 5 (is-wareeji), 6 (is-rux), iwm.

**Bilaawayaasha wada---hadalka:**
- Maxaad ku ogaatay qaabkeena?
- Waa maxay qaabka dhaqdhaqaaqa ee aynu isku dyno marka xiga?

## Wax Akhrinta iyo Qorida

**Wada heesa:**
Tani waa hees ah in ilmahaagu uu yaqaano.

**I'm a Little Teapot**
I'm a little teapot short and stout.
Here is my handle. Here is my spout.
(Gacanta midig ku qabso dhexda. Suxulka bidix kor u qaad iyadoo gacantaadu hoos u jeedo.)
When I get all steamed up Hear me shout,
"Tip me over and pour me out!"
(u leexi dhexda dhinaca bidixda)

# Buug-gelinta Akhrinta

Hubi maalin walba in adiga iyo ilmahaaga aad wada akhrisaan sheeko. Buugagta waxay noqon karaan kuwa ah af Ingiriisi ama luuqada gurigaaga. Booqo maktabadda dadweynaha xaafaddaada si aad u hesho buugaag badan oo ku saabsan midabada!

Isniin ______ Talaado ______ Arbaco ______ Khamiis ______ Jimco ______ Sabti ______ Axad ______

| **Buugaga aan ku akhrino dugsiga:** | **Buugaag kale adiga iyo ilmahaaga laga yaabo in aadjeclaataan:** |
| --- | --- |
| *Max's Dragon Shirt* qorey Rosemary Wells<br>*Dog's Colorful Day* qorey Emma Dodd | *Mouse Paint* qorey Ellen Stoll Walsh<br>*Little Blue and Little Yellow* qorey Leo Lionni |

# Tallooyinka si Wadajir ah u Akhrinta:

- Wada fadhiista meel xasilloon oo degan.
- Marka aad akhrinayso, iftiimi oo qeex erayada cusub. Tusaale ahaan, "**Disgusting** macnaheedu waa wax xun oo aan fiicnayn."
- Marka aad akhrinayso, weydii ilmahaaga su'aalaha ku saabsan buugga. Tusaale ahaan, "Sidee ayuu eygu ku helay baro badan oo midabo ah?"